# Kulanka Bulshada Ee Glendale

3da Maajo, 2025

# Nidaamka Kulanka

Waxaanu maanta dooneynaa in aan dhageysano ra'yigiina. Si taas loo gaaro oo qof kasta uga qeyb qaato kulanka ayaan nidaamkan iyo sharciyada loo dajiyey:

- Waa in kulanka looga qeyb qaataa si ixtiraam iyo isuku dul qaadasho ku dhisan.
- Waxa aan qof kasta ka fileynaa inuu naftiisa ka adkaado oo:
  - In aanu geysan qashqashaad jabineysa sida kulanka loogu kala horeeyo
  - In aanu fara gelin ka qeyb galayaasha si ay kulanka ula socdaan ama uga qeyb qaataan
  - In aanu abuurin jawi cabsi gelin ama qashaqashaad
- Haada rabtit ina Aad ka qeyb gashid waa ina sugta ilaa looga ka yeero si ay u hadhashid . Si loo xaqiijiyo in qof kasta helo fursad uu ku hadlo, qof kasta waxa uu faalada uu dhiibanayaa ku soo koobayaa 3 daqiiqo.

# Kulanka Maanta

- Dib u eeg shirarkii hore iyo su'aalaha inta badan la isweydiiyo iyo ballanqaadyada MPHA
- Dib u eegista afarta hab
- Dib u eeg jadwalka muddada dheer & talaabooyinka soo socda ee muddada gaaban
- Waqti dheeri ah oo su'aalaha/jawabada deganeyaasha loogu talagalay
- Gunaanad iyo xiritaan

# Baahida u ah Ballanqaadka Deganeyaasha

- MPHA ayaa maqashay walwalkaga iyo su'aalahaaga.
- MPHA waxay wadaagayaan ballanqaadyo si aan u wada shaqeyno si aan u gaarsiino hormarka aad rabto in la dhameystiro.
- Waxaan dooneynaa inaan waala hadalno, si aan uga dhigno bulshadeena mid aan ku faano.

# Balanqaadka Deganayasha #1

**Hawlaha MPHA waxaa xudun u noqonaya aragtida deganayasha**

# Balanqaadka Deganayasha #2

**MPHA  waxa ay sii wadeysaa in ay xaqiiqda dhabta ah u soo bandhigto deganayaasha iyo talaabooyinka la qaadayo**

# Balanqaadka Deganayasha #3

**Xisaabinta kirada waxa ay ahaaneysaa 30% ee dakhligaaga**

# Balanqaadka Deganayasha #4

**MPHA waxa ay 1:1 ula shaqeyneysaa degane kasta si loo tilmaamo fursadaha dib u dajinta oo wax looga qabto baahida gaarka ah. Deganayaasha oo lagu dhaafo goobta degaanka ilaa inta ay suurogal tahay**

# Balanqaadka Deganayasha #5

**MPHA waxa ay diyaarineysaa heshiiska, ee deganayasha, oo ay ka mid tahay sida ay MPHA uga go'an tahay ilaalinta xuquuqda deganayaasha**

# Guritanga Meelaysiinta & Ballanqaadyada MPHA

- Guritanga micnaheedu waa: kaguur gurigaaga hadda Aad dhakantahay kadib Uggur xafad kale Glendale dhaxdeyda mise guri kale oo ka baxsan Glendale,ka dibna dib ugu laabashada guryaha Glendale dhismaha Kadib.
- MPHA waxay saari doontaa tixgelinta reeraha marka la dhisayo iyo wakhtiyada dib u guuritaanka.
- MPHA waxay la wadaagi doontaa fursadaha qorshaynta deganayaasha ka hor inta aan si rasmi ah loo aqbalin
- Shaqaalaha MPHA ee u guuritaanka waxay si gaar ah ula kulmi doonaan qoys kasta si ay u fahmaan baahiyahooda gaarka ah ee la xidhiidha guuritaanka iyo guryaha cusub, waxayna ka wada hadli doonaan dhammaan fursadaha u guuritaanka ee jira.
- MPHA waxay Kusineysa Adeegyo rarid iyo xirmo ah, ama qoysaska waxay iska rari karaan iyagoo marka ay guurayaan gudaha iyo dibedda goobta dhismaha.
- Haddii qoofka uu doorto inuu ka tago ama qasbanaado inuu ka tago Glendale inta lagu jiro dhismaha, wuxuu xaq u leeyahay inuu ku laabto dhismaha ka dib.
- MPHA ayaa caawin doona wixii isbeddel ah ee Address ama adeegyada kale ee u baahan in la beddelo inta lagu jiro guuritaanka.

# Tallaabooyin Suurtagal ah & Waqtiga

## 2025

Spring Summer

Faallooyinka iyo Ra'yiga Deganeyaasha
- Guuritanga
- Xuquuqda Deganeyaasha
- Hababka

Himilo Wadaag ah, Ballanqaadyada MPHA, & Guddiga La-tashiga Deganeyaasha

## 2025 – 2026

Fall Winter Spring Summer Fall Winter

Qorshaynta Dib-u-guuritaanka & Heshiiska Dib-u-guuritaanka

Naqshadeynta & Qorsheynta Dhismaha

Hannaanka HUD

Maalgelinta Mashruuca

## 2027 & Beyond

Dib-u-guuritaanka

Bilabka Dhismaha

| Waxyaabaha aan kuu qaban karno | Dib u casriyeyn | Dib U Casriyeyn Lagu Daro Wax Dheeraad Ah | Guryo cusub oo dhinaca isku haya | Dhismayaal cusub oo ka kooban 3-4 dabaq oo guryaha qaar dhulka la siman yihiin |
| --- | --- | --- | --- | --- |
| Casriyeynta dibadda (daaqado cusub, oogada sare ee guryaha, saqafka) | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| Casriyeynta kuleylka, biyaha, qabowga, habka hawada | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| Dib u casriyeynta qaanadaha, dhulka, biyaha, qalabka suuliyada | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| Balaarinta jikada, goobta lagu cunteeyo, qolka fadhiga | | ✓ | ✓ | ✓ |
| **Horumarinta Ku Noolaashada Guriga Ee Naafada** | | | | |
| Suuli kale oo lagu daro dabaqa dhulka la siman | | ✓ | ✓ | ✓ |
| Qol hurdo oo lagu daro dabaqa dhulka la siman | | ? Waxaa lagaa yaabaa in aysan ku filneyn in qol hurdo lagu daro | ? Waa suurogal, taasoo ku xiran naqshadda | ✓ |
| Lagu daro guryo hal dabaq ah | | | ? Waa suurogal, taasoo ku xiran naqshadda | ✓ |
| **Ku Daritaanka Guryo Dheeraad Ah** | | | | |
| Ku daritaanka guryo balaaran (5 qol +) iyo guryo yaryar (1 qol) si ay uga faa'iideystaan qoysaska iminka deggan Glendale | | | ? Waa suurogal, taasoo ku xiran inta banaan, lagu bedesho, iyo muhimadda bulshada | ✓ Sida ugu wanaagsan ee loogu dari karo guryo cusub; tirada iyo nooca waa mid ku xiran wada hadalka mustaqbalka ee deganayaasha |
| **Horumarinta Dhismayaasha** | | | | |
| Joogteynta daaradda guryaha/dhulka cawska leh ee iminka jira | ✓ | ? Daaradda oo yar si loogu kordhin karo guryo dheeraad ah, waxaa loo isticmaali karaa goob cagaaran e bulshada | ? Daaradda oo yar si loogu dari karo guryo dheeraad ah, waxaa loo isticmaali karaa goob cagaaran ee bulshada | ? Ma laha ama daaradda oo yar si loogu daro kari guryo dheeraad ah, waxaa loo isticmaali karaa goob cagaaran ee bulshada |
| ku daritaanka goobo dheeraad ah oo gaadiidka la dhigto ee deganayaasha | | | ? Suurogal ay tahay in dhismayaasha hoostooda laga dhiso goob gawaarida la dhigto | ✓ Suurogal ay tahay in dhismayaasha hoostooda laga dhiso goob gawaarida la dhigto |
| ku daritaanka goobo dheeraad ah ee waxyaabaha bulshada ka faa'iideysato | | | | ✓ |

# Kulanka xiga:
# Thursday, 29da Maajo (May), 2025 4:00 – 6:00 Galabnimo

- Ra'yiga Dadweynaha iyo Kala Shaandheyntiisa
- Naqshad Lagu Ururinayo Ra'yida Dadweynaha Iyo Kala Shaandheyntiisa
- Xogtii Ugu Dambeysay ee Aqoonsiga Taariikhiga Ah oo ku saleysan talaabooyinka ay qaado Magaaladu

MINNEAPOLIS PUBLIC HOUSING AUTHORITY